**SHARCI L. 46 ee 31 luuliyo 1972**

**Waxbarashada Soomaaliya**

**Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka**

KADIB MARKI UU DHAGEYSIGA Golaha Xoghaynta dowladda;
QAATAYNA ogolaanshaha Golaha Saree e Kacaanka:

WUXUU SOO SAARAY:

Sharciga soo socda:

**CINWAANKA 1AAD**
Dabiicadda Guud ee Waxbarashada

**Qod. 1**

Ujeeddada waxbarashada Soomaaliya waa baridda muwaadinka horumarinta jirka-nafta oo wada socda, iyada oo lagu hoggaaminayo shakhsiyaddooda in ay noqdaan kuwo yaqaan xuquuqdooda iyo waajibaadkooda ee ku saabsan mabaad'da hantiwadaagga iyo daacad u ahaanshaha qarankooda. Diyaarna u ah ka qayb qaadasho waxku ool ah oo la taaban karo ee nolosha bulshada, siyaasadda, dhaqanka iyo dhaqaalaha dalka.

**Qod. 2**

Dawladdu waxay u aragtaa inay tahay waajibaadkeeda koowaad inay hubiso muwaadin kasta heerka waxbarasho ee uu xaq ugu leeyahay xirfadihiisa iyo dabeecadihiisa.

**Qod. 3**

Waxa la hubinaa ulajeeddooyinka lagu tilmaamay qodobka 1 iyada oo:

a) Ammarrada Manhajka ku soo arooray ee heerka iyo derejooyinka kala duwan ee Hey'adaha waxbaridda caadiga ah ee lagu tilmaamay qodobkla 7 ee sharcigaan;
b) Waxbaridda bulshada ee dowrooyinka dadka waaweyn iyo sidoo kale barnaamijyada diyaarinta iyo jeheynta qaran iyo howlaha dhallinyarda ee soo nbandhigidda waxakasta oo ah waxbarid iyo tababar.

**Qod. 4**

Dugsiyada oo idil dalka waxa labari doona diinta, falsafadda kacaanka, iyo mabaad'da hantiwadaagga cilmiga ku dhisan, sido kale af Soomaaliga, iyo dhaqanka taariikhiga ah ee dalka

**Qod. 5**

Xulashada ardayda bilaabaya waxbarashada dugsiga sare iyo tan jaamacadda had iyo jeer waxa ay dhacdaa kadib imtixaan iyadoo la raacayo nadaamka uu dejin doono xogheyaha guud ee waxbarashada dadweynaha.

**CINWAANKA 2AAD**
Xeerarka Dugsiyada

**Qod. 6**

1. Dugsiyada qaranku waxa ay u qaybsan yihiin seddax:
   a) Heerka koowaad

b) Heerka Sare
c) Heerka jammacadda iyo wixii ka sarreeya.

2. Heerka koowaad waxa loo sii qaybiyaa:
   i) Dugsi hoose;
   ii) Dugsi dhexe;
3. Dugsiga hoose waxa ka horreyn kara dugsiga xaddaanada ilmaha oo aqbala da'ada seddax ilaa lix sano.
4. Dugsiga heerka Jamacadeed iyo wixi ka sarreya waxa nadaamin doona qodobo kale oo sharci ah.

**Qod. 7**

1. Waxa jira dugsiga heerka hoose:
   a) Maamulaha waxbaridda
   b) Guddiga waxbarista.
2. Waxa jira dugsiga heerka labaad:
   a) Hormuud
   b) Golaha bareyaasha sare.
3. Qawaaniinta ku saabsan howlaha iyo shaqooyinka xubnahan waxa lagu xusay xeerarka dugsiga.

**Qod. 8**

1. Qawaaniinta dugsiyada, barnaamijyada waxbaridda, jadwalka iyo nidaamka qiimeynta ardayda waxaa habeeyay wareegtada Madaxweynaha Golaha Sare Kacaanka, kadib soo jeedinta Xoghayaha Waxbarashada Dowladda.
2. Shaqooyinka gacanta laga qabto waa qasab dugsiyada oo idil.

**Qod. 9**

Nooc kasta oo dugsi ah ayaa lagu maamula nidaamkiisa u gaarka ah kaas oo lagu ansixiyay laguna dhaqan gelinayo wareegtada Madaxweynaha Golaha Saree e Kacaanka, kadib soo jeedinta Xoghayaha Waxbarashada Dowladda.

**Qod. 10**

1. Sannad dugsiyeedka ayaa socda sagaal bilood oo loo qaybio laba xilli.
2. Jadwal dugsiyeedka waxa la dejiyaa billowga sannad dugsiyeedkasta iyada la fulinayo amarka Xoghayaha waxbarashada Dowladda.

**Qod. 11**

1. Waxbarashada dugsiyada hoose dhexe iyo sare ee dugsiyada dowladda waa bilaash.
2. Khidmadaha Kulliyadaha waxaa xusaya sharciga 8 Abriil 1971 n. 31.

**Qod. 12**

1. Ku qoridda dhammaan dugsiyada Dowladda waxa loo ogolaan kara ciddi ku dhex jirta da'da soo socoto:
   a) Faslka 1aad ee dugsiga hoose da' aan ka hooseyn lix sano kana badneyn sagaal sano.
   b) Fasalka 1aad ee dugsiga dgexe da' aan ka badneyn 15 sano.

c) Fasalka 1aad dugsiga sare da’ aan ka badneyn 20 sano.

2. Si loo xaddido da’da kor ku xusan waa in la xisaabiyaa iyada oo loo eegayo sannadka dhalashada.
3. Marka laga hadlayo xaaladaha fasallada kale, waa in xadka da'da ee kor lagu soo xusay, la dhowro fasal ku meelaynta.
4. Xadka da'da kor ku xusan ayaa lagu dabaqi doonaa ardayda laga diiwaangeliyo dugsiyada taariikhda dhaqan galka sharcigan.
5. Dhamman dadka aan ku qorneyn fasallada kala duwan, ee ka saramaray da’da lagu xaddiday qaybta 1 (a,b &c) ee qodbkaan, waxa ay xaq u leeyihiin in ay isku qoraan dugsiyada dadka waaweyn.

**Qod. 13**

1. Isku qorida Digsiyada heer kasta waxa ay ku xirantahay xaqiijinta in ardayga uusan ku dhicin cudurada la is qaadsiiyo iyo in la maray talaalada qasabka ah ee sharcigu farayo.
2. Baaritaan caafimaad oo soo noqnoq da ayaa loo diyaarin doonaa ulajeeddadan.

**Qod. 14**

Ardayga ka yimaada Dugsi ay aqoonsantahay wasaarada waxbarashadu waxaa lagu qori karaa dugsiga dowladda, wxaana lagu qori karaa fasalka uu ku habboon yahay kadib qiimayn ay sameeyaan gudi uu magacaabo agaasime waxbaridda ama Hormuudka dugsiga.

**Qod. 15**

U gudbidda fasalka sare dhamaadka sannad dugsiyeed kasta wuxuu ku yimaadaa hubin iyada oo la dhowrayo qawaaniinta u degsan dugsiga.

**Qod. 16**

1. Marka uu dhammaystiro waxbarashada dugsiga hoose, dhexe iyo sare, ardaygu waa inuu galaa hal imtixaanka oo shahaaddo ah;
2. Imtixaannada Shahaaddada ee dhexe iyo kan sare waxaa loo diyaarin doonaa ardayda heerkooda aqooneed sarreyo;
3. Xeerarka imtixaannada lagu soo xusay faqradaha sadarrada 1 iyo 2 ee sare waxaa lagu qeexay xeerarka dugsiga;
4. Ardayga ku gudubtay imtixaanka Shahaaddada, waxa ay u kala horreeyaan:
   i) Shahaadada Dhameystirka Dugsiga Hoose:
   ii) Marqaatifurka Shahaadada Dugsiga Dhexe:
   iii) Shahaaddada Dibloomada Dugsiga Sare.
5. Heerarka waxbarasho ee kor lagu xusay waa inay ka warbixiyaan dhibcaha laga helay dhammaan imtixaannada la qaaday.

**Qod. 17**

Ku celcelin aan ka badneyn labo sano ee dugsiga hoose, iyo wax aan ka badneyn hal sano ee dugsiga dhexe iyo dugsiga sare waa la oggol yahay.

## CINWAANKA 3AAD
Dugsiga Hoose

### Qod. 18

1. Dugsiga Hoose waxa uu socon 4 sano.
2. Dugsiga xannaanada ee ka horeeya dugsiga hoose waxa uu socon karaa muddo 3 sano ah.

### Qod. 19

Ardayda haysata shahaadada dugsiga hoose waxa laga diiwaangeliyaa fasalka koowaad ee dugsiga dhexe.

### Qod. 20

1. Dugsiga Dhexe waxa uu sicon 4 sano.
2. Dhameystirka dugsiga dhexe kadib, koorsooyin xirfadeed ama farsamo xirfadeed ayaa lagu abaabuli karaa, hadba iyada oo loo eego baahida dhaqan-dhaqaale ee dalka.

## CINWAANKA 4AAD
Dugsiga Sare

### Qod. 21

1. Dugsiga Sare waxa uu socdaa muddo 4 sano ah.
2. Dugsiyada darajda sare waxay u kala qaybi karaa jihooyin kala duwan hadba iyada lala xiriirinayo baahida dhaqan-dhaqaale ee dalka.

## CINWAANKA 5AAD
Dugsiga Gaarka ah

### Qod. 22

Dugsiyada gaarka loo leeyahay waxaa maamula sharci u gooni ah.

## CINWAANKA 6AAD
Waxbaridda Dadweynaha

### Qod. 23

1. Waxbarashada guudahaan waxaa la bartaa dowrooyin cinwaanno kala duwan ah oo la xiriira baahida bulshada, dhaqaalaha iyo dhaqanka Umadda.
2. Ammarka habeynta dowrooyinka waxbarashada shacabka waxaa lagu jaangooyaa wareegtada Xoghayaha Waxbarashada Dowladda.

### Qod. 24

1. Si loo helo iskudubarid wanaagsan oo nidaamsan oo ku saabsan dadaallada kala duwan ee laga hirgalinayo waxbaridda shacabka, waxaa la sameeyay Guddi heer qaran ah oo iskuduwa waxbarashada dadweynaha oo ka kooban Wasaaradda Waxbarashada, iyo wakiillo ka socda wasaaradaha iyo ururrada daneeya arrimaha bulshada.
2. Qeybaha guddiga kor ku xusan iyo howlahooda waxaa lagu asaasay wareegtada Xoghayaha Dowladda ee Waxbarashada.

**Qod. 25**

Waxa hoos imaanaya wajibaadka wasaaradda waxbarashada fulinta ujeeddooyinka ku tilmaaman cinwaankaan ee soo socda:

a) Habeyn dowrooyin kor loogu qaadayo iyo tababarid waxbarasho xagga waxbaridda shacbiga.
b) Fidinta bugaagta aqoonta guud iyo xirfadaha dadka waaweyn.
c) Helitaanka hababkka waxbaridda ee aad ugu habboona waxbaridda shacabka.

## CINWAANKA 7AAD

Xagga Ardayda

**Qod. 26**

1. Marka laga reebo Dugsiga  xaddaanada, ardayga ka diiwaangashan dugsiga Dowladda waxaa ku waajib ah in uu xaadiro sannadka oo idil.
2. Haddii uu dhacdo maqnaansho ardaygu waa in uu keenaa cudurdaar.
3. Ardayga maqnaada muddo ka badan 60 maalmood sannad dugsiyeedka ma geli karo fasalka sare ilaa si ku habboon uu  u qiimeeyo guddi gaar ah  oo uu magacaabo guddoomiyana u yahay agaasimaha waxbaridda ama Hormuudka Dugsiga.

**Qod. 27**

1. Ardayda aan dhowrin waajibaadka iyo aadaabta dugsiga, sharafrida ama aan  ixtiraamin macallimiinta iyo madaxdooda kale sameeyana xadgudb anshax ayaa lgua ciqaabaa, iyadoo loo eegayo hadba heerka dembiga, ciqaabta soo socota:
   a) Billowga in loo yeero canaan afka;
   b) qoraal wanaagsan oo waalidiinta loo diro;
   c) ka saarid hal ama ka badan casharrada maalinlaha ah;
   d) ka joojin casharrada ugu badnaan 15 maalmood;
   e) ka joojinta casharrada sannad dugsiyeedka oo dhan;
   f) ka cayrin dhammaan dugsiyada Jamhuuriyada sannad dugsiyeedka;
   g) ka reebid rasmi ah dhammaan dugsiyada dalka.
2. Guuldarada sanad dugsiyeedka kadib cayrinta ku xusan faqrada (f) ee kore waxaa laga goynayaa mudada soo celinta ee la siiyay ardayga sida ku xusan qodobka 17aad ee sharcigan.

## CINWAANKA 8AAD

Macallimiinta

**Qod. 28**

Dowladdu waxa diyaarinee oo ay abuureysaa unug ku takhasusay macallimnimada kala duwan ee Dugsiga xaddaanada, Hoose/dhexe, Sare iyo Jaamacad.

**Qod. 29**

Waa waajibka macallinka:

a) marka ay gudanayaan waajibaadkooda waxay u hoggaansan yihiin mabaadi'da qodobka 1aad ee sharcigan;
b) ilaalinta cusboonaysiinta joogtada ah ee qofka guud ahaan dhaqankiisa xirfadiisa oo aad ku hagto waxbaridda qofka ee maaddada iyo habka loo maro isbeddelka xaqiiqada bulshada;
c) nolosha guud iyo tan gaar ahaaneedba waxa ay qabtaan anshax ku habboon barayaasha wacyi gelinta ku saabsan in waxbarashada iyo shaqada dhiirrigelinta aysan ku ekaaneyn dugsiga;
d) la shaqeynta si togan agaasimaha waxbaridda iyo hormuudka dugsiga iyo saaxiibadii;
e) in ay abaabulaan oo iskaashi la yeeshaan madadaalada, daryeelka iyo nashaadaadka horumarinta bulshada iyo ka qeyb qaadashada mashaariic iskaa wax u qabso ah;
f) Dhiirrigelinta in la xoojinta wada shaqeynta ka dhaxaysa dugsiga, qoyska iyo bulshada, iyada oo loo marayo machadyada ka shaqeeya ujeeddadaa.

**Qod. 30**

Dowrarka macallimiinta Dugsiga xaddanada, hoose/dhexe iyo kan sare waxaa lagu aqbalaa ka dib tartan imtixaan.

**Qod. 31**

1. Macalinku waa in uu noqdaa qof leh habdhiska jir caafimaad qab ah, leh ka hortagga cudurada aana qabin cillado ay dhici karto in ay wax u dhimaan caafimaadka carruurta dugsiga ama ka ciriirin kara in ay gutaan waajibaadkooda guriga.
   Diiwaan caafimaad oo gaar u ah macalin kasta ayaa loo asaasay ujeedkan.
2. Dhammaan macallimiinta ayaa mari doona baaritaan caafimaad oo xilliyeed si loo hubiyo joogteynta xaaladaha kor ku xusan.

**Qod. 32**

Dhammaan macallimiinta waxaa looga baahan yahay inay ka qeybgalaan dowrooyinka dib u cusboonaysiinta iyo wanaajinta ay soo qabanqaabiso Wasaaradda Waxbarashada.

**Qod. 33**

1. adeegga macallimiinta ayaa loo qiimeeeyaa sannad kasta: liita - ku filan - wanaagsanaan - aad u wanaagsan - ugu wanaagsan.
2. Macallimiinta lagu qiimeeyo liidasho laba sano oo is xiga shaqada waa laga fogeeyaa. Intaas waxaa sii dheer, macallinku wuxuu xaq u leeyahay inuu rafcaan u diro guddiga dejiyey qawaaniinta dhaqan gelinta sharcigan.
3. Xeerarka dugsiga ayaa qeexaya shuruucda hirgelinta.

**Qod. 34**

Meeleynta kursi iyo wareejinta macallimiinta waxaa habeeya Wasaaradda Waxbarashada, taas oo ku siisa iyaga ka dib markay go'aamiyaan shuruudaha guud, iswaafajinta halka ay suurogal ka tahay, baahida sare ee dugsiga iyo himilooyinka saxda ah ee dhinacyada xiiseynaya.

**Qod. 35**

1. Xaaladda sharciyeed iyo macaamilka dhaqaale ee shaqaalaha waxbaridda waxaa go'aamiya wareegtada Madaxweynaha Golaha Sare Kacaanka kadib soo jeedinta Xoghayaha Dowladda ee Waxbarashada, iyadoo lala tashanayo hay'adaha kale ee karti u leh, u hoggaansanaanta sharciga lagu xoojinayo arrimaha shakhsiyaadka rayidka ee Dowladda.
2. Macallimiintu way ku raaxeysan karaan fasaxa caadiga ah ee ay xaq u leeyihiin iyadoo la raacayo qodobka 27aad ee sharciga 1-da abriil 19700, n. 29, keliya inta lagu gudajiro xilliyada fasaxa sannadlaha ah ee loo asteeyay Dugsiyada.

**CINWAANKA 9AAD**

Shaqaalaha Maamulka iyo Kormeerka

**Qod. 36**

1. Shaqaalaha maamulka ayaa lagu kala saarayaa dowrarka dabiiciga ah:
   i) agaasimayaasha waxbaridda ee xaddaanada iyo dugsiga hoose;
   ii) maamulaha dugsiga sare.
2. Shaqaalaha kormeerka waxaa lagu kala saaraa dowrarka dabiiciga ah:
   i) iKormeerayaasha dhexe ee dugsiyada;
   ii) Saraakiisha waxbarashada gobollada;
   iii) Kormeerayaasha dugsiyada gobollada.

**Qod. 37**

1. Magacaabidda shaqaalaha maamulka waxa XEER ku soo saara xolghayaha Dowladda ee waxbarashada dadweynaha;
2. Magacaabidda shaqaalaha kormeerka waxa XEER ku soo saara Madaxweynaha Golaha Sare ee kacaanka, kadib soo jeedinta Xoghayaha Dowladda ee waxbarashada dadweynaha.

**Qod. 38**

1. Xaddaanada caruurta iyo Dugsiyada hoose waxaa hogaamiya agaasime waxbarasho.
2. Heerka dugsiyada sare waxa hoggaamiya Hormuud.
3. dhowr dugsi hoose/dhexe oo isku heer ah ayaa lagu qori karaa hal maamule.
4. Dugsiga hoose iyo dugsiga dhexe dib ayaa la’isugu dari karaa hal maamul oo la mideeyay.

**Qod. 39**

1. Maamulaha dugsiga xaddaanada iyo dugsiga hoose iyo maamulaha dugsiga sare ayaa mas'uul ka ah horumarka, edbinta iyo maamulka ee dugsiga iyo dhowrista qoraalada rasmiga ah iyo diiwaan gelinta nidaamyada dugsiga. Iyaga ayaa wakiil ah qalabka waxbarista maaddada, iyo buuggaagta la keeno dugsiga.
2. Agaasimaha waxbaridda iyo maamulaha waa laga dhaafi karaa barista.

**Qod. 40**

Meeleynta shaqaalaha kormeerka waxa lagu soo saara wreegtada madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka, kadib soo jeedinta Xoghaya Dowladda ee waxbarashada dadweynaha.

**Qod. 41**

1. Xaaladda sharciyeed iyo macaamilka dhaqaale ee shaqaalaha maamulka iyo kormeerka waxaa go'aamiya wareegtada Madaxweynaha Golaha Sare Kacaanka kadib soo jeedinta Xoghayaha Dowladda ee Waxbarashada, iyadoo lala tashanayo hay'adaha kale ee karti u leh, u hoggaansanaanta sharciga lagu xoojinayo arrimaha shakhsiyaadka rayidka ee Dowladda;
2. Maamulayaasha iyo hormuudyada way ku raaxeysan karaan fasaxa caadiga ah ee ay xaq u leeyihiin iyadoo la raacayo qodobka 27aad ee sharciga 1-da abriil 19700, n. 29, keliya inta lagu gudajiro xilliyada fasaxa sannadlaha ah ee loo asteeyay dugsiyada.

**Qod. 42**

Shaqaalaha maamulka iyo kormerka waxa loo qiimeeya si sannadle ah sida ku xusan qodobka 33.

**CINWAANKA 10AAD**

Qodobbada ugu Dambeeya iyo Kumeelgaarka

**Qod. 43**

Luqadaha wax lagu barto ee hadda jira ayaa shaqeyn doona illaa iyo inta qodobbada quseeya qorista af-Soomaaliga ay qaadato dowladdu.

**Qod. 44**

Madaxweynaha Golaha Sare Kacaanka, kadib soo jeedinta Xoghayaha Dowladda ee Wasaaradda Waxbarashada, wuxuu soo saarayaa qawaaniinta loogu talagalay hirgelinta sharcigan, waxaa kale oo ku jira xeerarka u degsan qorshaha koowaad ee dowrarka waxbaridda, maamulka iyo kormeerka ee shaqeynaya taariikhda dhaqan galka sharcigaan ee isla sharcigan laftiisa.

**Qod. 45**

Waa la tirtiray dhammaan qawaaniinta ka hor imaaneysa sharcigan ama aan la socon karin.

**Qod. 46**

1. Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa maalinta xigta ku faafintiisa wargeyska rasmiga ah.
2. Sharcigan waxaa la galin doonaa Ururinta Rasmiga ah ee sharciyada Jamhuuriyada.
3. Waxaa waajib ku ah cid kasta oo loo xilsaaro kormeerida iyo ku dhaqanka sharciga in uu dhawro oo uu u xafido sida uu yahay sharciga Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 31 luuliyo 1972.

Madaxweynaha

Golaha Sare ee Kacaanka

**Jaalle Jene. Maxamed Siyaad Barre**